

Qasnadda shaqeyneysa ee jaamacadda wax baridda
iyo cilmibaarista
Bridge Park Plaza
Bridge Park Road
Thurmaston
Leicester
LE4 8PQ
www.leicspart.nhs.uk

Siteembar 2021

Waalidka / Daryeelaha Qaaliga ah,

Barnaamij xilliyeedka tallaalka hargabka

Maadaama uu qeyb ka yahay barnaamijka tallaalka qaranka, Adeegga Tallaalka Bulshada ee Qasnadda NHS ee Shuraakada Leicestershire waxaa uu jeclaan lahaa inuu idin siiyo fursad looga badbaadinaayo carruurta iyo dadka da'da yar hargabka xilliyeedka jiilaalka (durey).

Barnaamijka tallaalka hargabka waa ahmiyad sare oo qeyb ka ah siyaasadda caafimaadka dadweynaha sannad walba. Si kastaba ha ahaatee, marka loo eego halista hargabka iyo Covid-19 sida ay u wada xiriiraan jilaalkaan, barnaamijka qaran ee tallaalka hargabku wuxuu dhabtii muhiim u noqonayaa sidii loo badbaadin lahaa carruurta iyo dadka unugul oo ay kujiraan nuuneyaasha iyo duqeyda iyo waliba sidii loo taageeri lahaa adkaysiga nidaamka caafimaadka iyo daryeelka. Dalabkaan lagu doonayo in dadka hargabka looga tallaalo waa la ballaariyay si loogu soo daro dad badan oo da' yar ah oo dhigta dugsi sare.

Carruurta laga soo bilaabo marka la fariisiyo dugsi ilaa sannadka 11 (kuwaasi oo dhashay inta u dhexeysan 1^{da} Siteembar 2005 iyo 31^{ka} Agoosto 2017) waxaa ayagoo iskoolka jooga tallaalka hargabka laga siin doonaa sanko. Carruurta yaryar ee jira 2 ilaa 3 sano waxaa la siin doonaa tallaalka hargabka markii qalliin guud u uku samaynayo dhaqtarka guud.

Si aad u akhrido macluud ku saabsan da'da caruurta ee dugsi hore booqo websaydka: <https://tinyurl.com/fluprimary>

Si aad u akhrido macluud ku saabsan da'da caruurta ee dugsi sare booqo websaydka: <https://tinyurl.com/flusecondary>

Si aad u ogaato macluumaad ku saabsan barnaamijka talaalka qaranka booqo www.nhs.uk/conditions/vaccinations

Carruurta leh xaalado caafimaad oo gaar ah kuwaas oo caadiyan ka qaata tallaalka hargabka dhakhtarkooda gaar kah ayaa lagu tallaali karaa dugsigooda. Ku dhowaad dhammaan carruurta ayaa waxay talaalka ku qaadan doonaan in tallaalka lagu buufiyo sanko. Tiro aad u yar oo carruurta ka mid ah ayaa laga yaabaa inay awoodi waayaan in talaalka lagaga buufiyo sanko sababo caafimaad awood. Haddii arrintu sidaas tahay, waan ku soo wici doonnaa si aan kuugu sharraxno sababta oo aan uga wada hadalno haddii ilmahaagu u qalmo tallaalka la isku duro.

Bedelka u dhigma talaalka Hargabka oo bilaash ah

Trust Headquarters: Bridge Park Plaza, Bridge Park Road, Thurmaston, Leicester. LE4 8PQ

Chair: Cathy Ellis Chief Executive: Angela Hillery

We are a smoke-free Trust.

View our privacy notice at www.leicspart.nhs.uk/_Aboutus-Whatwedowithyourinformationprivacynotice.aspx

Waxaan aqoonsannahay in *gelatine* loo isticmaalo soo saarista tallaalka durayga ee sanku aysan u fiicnayn waalidiinta qaarkood; sidaa darteed, waxaan sidoo kale bixinaynaa talaalka *gelatine* oo lacag la'aan ah. Markaad go'aan ka gaareyso inaad tan doorato, fadlan maskaxda ku haay in duritaanka lacag la'aanta ah ee *gelatine*:

- uu ka waxtar yar yahay tallaalka durayga ee sanku;
- duritaanka muruqa waxay noqon kartaa mid aan raaxo lahayn oo waa dhib badan yahay. Fadlan tixgeli haddii ilmahaaga ama qofka dhallinyarada ahi awoodo inuu u hoggaansamo duritaanka dugsiga iyada oo aan waalidku joogin. Way fiicnaan lahayd haddii aad u diyaarin lahayd.

Sanduuqa hoose wuxuu ina tusayaa tilmaamo ku saabsan sida loo buuxiyo foomka oggolaanshaha, oo ay ku jirto sida loo doorto duritaanka hargabka ee bilaashka ah ee *gelatine*.

IN LAGUGU TALLAALO DUGSIGA

Buuxi foomka oggolaanshaha ONLAYNKA adigoo booqanaya:

- www.leicsandrutlandimms.co.uk
- Dooro Hargab xilliyeed
- Waxaad u baahan doontaa koodhka dugsigaaga. Herrick Primary School Koodhka iskuulku waa LE120100
- Waxaad heli doontaa emayl xaqiijin ah marka foomka la soo gudbiyo.

*Waxad ku iskaan
gareyn kartaa furahaan
QR kaamerada
taleefankaaga casriga ah
si aad toos ugu gasho
barteenna internetka*



Tilmaan sare: Hubi in cinwaanada iimaylka ay is waafaqsan yihiin iyo in aysan jirin meelo ama astaamo ka maqan yihiin ka hor ama ka dib cinwaanka iimaylka iyo koodhka dugsiga.

Waxaad u baahan doontaa inaad si buuxda u buuxiso foomka oggolaanshaha kahor kulanka tallaalka.

Waxaa lagu ogeysiin doonaa taariikhda tallaalka dugsigaaga. Taariikhahaan sidoo kale waxaa laga heli karaa mareegahayaga, booqo: www.leicspart.nhs.uk/communityimms

Waxaan si ku -meelgaar ah u xiri doonaa nidaamka 1 maalin shaqo ka hor fadhiga si uu noogu oggolaado inaan isu diyaarinno. Nidaamka ayaa dib loo furi doonaa isla casharka kadib si aad u buuxiso foomka oggolaanshaha iyo tafaasiil dheeraad ah oo ah fursad kale oo tallaalka lagugula wadaagi doono.

Haddii aad rabto inaad doorato duritaanka hargabka bilaashka ah ee *gelatine*, fadlan buuxi foomka oggolaanshaha sida caadiga ah. Bogga caddaynta oggolaanshaha, fadlan dooro “maya” oo ikhtiyaarka ayaa la bixin doonaa.

Si aad noogu soo sheegto wixii isbeddel caafimaad ah ama aad maskaxdaada uga beddesho tallaalka, fadlan la xiriir kooxda.

Haddii aadan awoodin inaad ku buuxiso tan hab onlayn ah, fadlan naga soo wac 0300 300 0007 si aad u codsato taageero. Mid ka mid ah kooxdayada ayaa laga yaabaa inuu u baahdo inuu dib kuu soo waco si uu u buuxiyo foomka.

Tallaalka ka dib, talo iyo macluumaad ayaa laguugu soo diri doonaa emaylka waxaana la cusboonaysiin doonaa diiwaanka caafimaadka ee NHS ee qofka dhallinyarada ah.

Haddii canugga ama qofka dhalinyarada ahi uu maqan yahay maalintaas, fursad dheeraad ah ayaa loo heli doonaa tallaalkiisa. Fadlan ogow tallaalkan si joogto ah uma uu bixin doono dhakhtarkaaga gaarka ah marka laga reebo haddii ilmahaagu ku jiro kooxda halista ku jirta.

Covid-19

Haddii ilmahaaga ama xubin ka tirsan qoyska ay la nool yihiin oo ay is-go'doomiyaan ama la kulmaan mid ka mid ah astaamaha hoos ku qoran maalinta fadhiga markaa fadlan ha soo xaadirin ballanta tallaalka.

- **Heerkul sarreeya - waxaad dareemi doontaa kulayl marka la taabto laabtaada ama dhabarkaaga**
- **Qufac cusub oo isdaba joog ah - tan micnaheedu waxaa weeye in aad qufacday marar badan.**
- **Lumid ama isbeddel ku yimaada dareenkaaga urka ama dhadhanka - tani waxay ka dhigan tahay inaad ogaatay inaad wax urin karin ama dhadhamin karin, ama waxyaabaha qaar ay kuugu uraan ama kuugu dhadhamaan si ka duwan sida caadiga ah.**

Waxaan aad ula shaqeyneynaa dugsiga ilmahaaga si aan u hubinno in dhammaan tallaabooyinka badbaadada Covid ee habboon ay diyaar yihiin si loo hubiyo in tallaalka si ammaan ah loo gaarsiinayo.

Waxaan ka codsanaynaa dhalinyarada da'doodu tahay 12 iyo ka weyn inay u hoggaansamaan siyaasadda dugsiga ee adeegsiga daboolidda ama maaskiga wejiga. Shaqaalahaennu waxay sii wadi doonaan inay u hoggaansamaan adeegsiga Qalabka Badbaadada Shakhsiga (PPE), kala fogaanta bulshada iyo dhaqannada nadaafadda gacmaha si loo yareeyo halista gudbinta.

Macluumaad Dheeraad ah.

Waxay noqon doontaa arrin caawimaad leh haddii aad cunugaaga kala hadashid tallaalkaan si aad u diyaariso. Waxaan samaynay filimo muqaallo ah oo sharraxaad ka bixinaaya waxa hargab uu yahay iyo tallaalka sanku laga qaato ee hargabka. Baraha internetka ayaa sidoo kale wanaag cajiib ah leh oo waxaa laga helaa qoraallo ku saabsan maadooyin caafimaadka la xiriiira waxaana ku jira macluumaad ku saabsan hawlo xiiso leh ahna is dhexgal ah.

Xog ku saabsan da'da caruurta ee dugsiga hoose, Booqo: www.healthforkids.co.uk/staying-healthy/stopping-flu

Xog ku saabsan da'da caruurta ee dugsiga sare, Booqo <https://www.healthforteens.co.uk/health/flu/>

Waxaan fahamsanahay in qaarkiin laga yaabo inay qabaan su'aalo ku saabsan tallaalka ay heli karaan carruurtiinnu. Waxaan u qaban doonaa qaar ka mid ah fadhiyada su'aalaha iyo jawaabaha waalidiinta oo leh guddi ka kooban xirfadlayaal caafimaad toddobaadyada soo socda. Fadlan kaga xidhnow Leicestershire Partnership NHS Trust Facebook, Twitter

(@LPTnhs) iyo Instagram (@lptnhs) si aad u ogaato taariikhaha iyo faahfaahinta talaabooyinka ku biirista.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah waxaad kala xiriiri kartaa kooxda, taleefan: 0300 300 0007, ama iimayl: communityimmunisations.service@nhs.net Tirooyinka wicitaanadu aad bay u sarreeyaan muddada aan bixinno tallaallada durayga waxaana laga yaabaa inaad sugto waqti dheeraad ah si looga jawaabo wicitaankaaga.

Si naxariis leh.



Dr Tim Davies
Lataliyaha Hoggaanka ah
Baaritaanka iyo Tallaalka

NHS England iyo NHS Improvement – Midlands



Marie Butterworth
Hoggaanka Caafimaadka
Adeegga Tallaalka ee Carruurta Da'da
Lagu Dhigto Iskoolada Jira
Leicestershire Partnership NHS Trust

Haddii aad jeclaan lahayd inaad warqaddaan ku aqrisato luuqad kale gal barteenna www.leicspart.nhs.uk/communityimms

Carabi إذا كنت ترغب في قراءة هذه الرسالة بلغة أخرى، قم بزيارة موقعنا على الإنترنت

Gujarati જો તમે આ પત્ર ગુજરાતીમાં વાંચવા માંગતા હો તો અમારી વેબસાઇટ પર જાઓ

Polish Jeśli chcesz przeczytać ten list w innym języku, przejdź na naszą stronę.

Punjabi ਜੇ ਤੁਸੀਂ ਇਸ ਪੱਤਰ ਨੂੰ ਕਿਸੇ ਹੋਰ ਭਾਸ਼ਾ ਵਿੱਚ ਪੜ੍ਹਨਾ ਚਾਹੁੰਦੇ ਹੋ ਤਾਂ ਸਾਡੀ ਵੈੱਬਸਾਈਟ 'ਤੇ ਜਾਓ

Soomaali Haddii aad jeclaan lahayd inaad ku akhrido warqadan luuqad kale, booqo boggayaga internetka

Urdu اگر آپ اردو میں یہ خط پڑھنا چاہتے ہیں تو ہماری ویب سائٹ پر جائیں۔

OGEYSIISYADA BUUXINTA FOMKA OGOLAANSHAHA EE ONLAYNKA AH

Booqo: www.leicsandrutlandimms.co.uk

Xulo Hargab Xilliyeed adigoo gujinaaya “Guji halkaan” batoonka ah ee ku xiga isaga.

Bogga xiga gal oo xaqiiji cinwaanka emailkaaga

Qor furaha iskoolkaaga: LE120100 oo guji hel iskool. Waa inuu soo baxaa magaca iskoolkaaga.

Waxaan si ku meel gaar ah u xiri doonaa nidaamka hal maalin oo shaqo oo ka horreysa xiisadda si taasi noogu saamaxdo inaan is diyaarino. Farrriin ayaa soo bixi doonta taasi oo kaa dalbeysa inaad mar kale isku daydo xiisadda kadib waxayna ku siinaysaa fursad baddal ah oo loogu tala galay tallaalka.

Talada ugu fiican:

- Si aad u hesho boggeena ugu horreeya waxaad sidoo kale ka baari kartaa onlayn “Leicester imms”
- Xaqiiji in cinwaanka emailku uu isku dhigmo aysanna jirin wax boosas ah oo u dhexeeya xarfihiisa ama shaqal iwm oo ah ka hor iyo kadib cinwaanka emailka iyo furaha iskoolka.

QEYBTA 2: Caddeynta Ogolaanshaha

Buuxi tan si aad u bixiso ogolaanshaha tallaalka hargabka.

Xulashada lagu dooranaayo tallaalka dadka lagu mudi karo halkaan umbaa lagu bixiyay.

QEYBTA 3: Taariikhda Caafimaadka

Ka jawaab suaalaha ku saabsan taariikhda tallaalka iyo wixii kaloo taageero ah oo loo baahan yahay inta tallaalku socdo.

FOOMKAAN WAA UN IN UU BUUXIYO QOF LEH MASUULIYAD WAALIDNIMO.

Talo ku saabsan masuuliyadda waalidnimo waxaa laga heli karaa halkaan: www.gov.uk/parental-rights-responsibilities

Dadka qaangaarka ah ee wali laakiin da'da yare e dhigta dugsi sare way isu ogolaan karaan naftooda inay qaataan tallaalka adigoon aqbalin oo iyana xirfadleyaasha caafimaadka ayaa qiimeyn ku samayn doona awoodooda ay ku qaadanayaan go'aan kadib markii macluumaadka oo dhan loo sheego.

Wadaagidda xogta: Kadib markii tallaalka lagu qaato iskoolka, ogeysiis ayaa la bixin doonaa oo xogta waxaa lagu dari doonaa diiwaanka caafimaadka ee NHS ee cunugaaga.

Si aad ugu turjumto xogta ku jirta barta internetka ee NHS luuqad tan ka duwan, booqo: www.nhs.uk/accessibility/health-information-in-other-languages